

Waxbarashada deegaanka iyo bulshada

Madoonaysaa in aad waxka ogaatid, kana baratidna sida dadku iyo deeganadu ay u horumareen?
Madoonaysaa in aad wax barashadaada sii wadatid kadib marka aad dugsiga sare aad ka baxdid?
Madoonaysaa in aad lahaatid wax barasho aad u balaadhan oo dugsi sare ah?
Madoonaysaa in aad noqotid mid u fikira una qora, una hadla waxyaalo si heer cilmiyeesan ah?
Madoonaysaa in aad horumar balaadhan ku sameysid aqoontaada iyo kartidaada, adigoo si wadajir ah la shaqeynaya dad kale?
Haddaba waxbarashadan deegaanka iyo bulshadu waa mid adiga ku gu haboon.

Waxbarashadan deegaanka iyo bulshada waxa aad baran doontaa casharada sida, taariikhda, luqadaha, dhaqaalaha. Waxbarashadana waxa ay kuu sii fudu deenaysaa in aad jaamacadaha aad waxbarashadaada aad ka sii wadatid.

Waxa aad tijaabooyin ku sameynaysaa luqada afkaaga habab kaladuwan. Qoraalebadana waad sameendoontaa, qudbado iyo sharaxyo badana waad kaga hadli doontaa dadka hortooda ee ku dhageeysanaya. Waxaad kaloo aad fursad u heli doontaa in aad baratid luqado kale oo aan aheyn swiidhish. Wax barashadani waxa ay kuu furaysaa jidad ama albaabo farabadan oo aad waxbarasho ku gaadhikartid, kana shaqeyn kartid wadamo badan oo caalami ah oo dibada ah.

In aad shaqeysid ama waxbarashadaada aad sii wadatid.

Waxbarashadan deegaanka iyo bulshadu waxa ay tahay sideedaba mid aad waxbarashadaada aad sii wadan doontid kadib marka uu kuudhamaado waxbarashada dugsiga sare. halkaas oo aad waxbarasho ka dhigankartid jaamacadaha.

Shaqooyinka aad helikareysid.

Waxa ay ku xidhantahay hadba waxa aad baratay kadib marka aad kabaxdid dugsigasare, mustaqbalka waxa aad raad sankaraa shaqooyin farabadan oo kaladuwan, tusaalo ahaan waxaad ka shaqeenkartaa sida ,looyarnimo, dhaqaalaha, adeegabulshada, gargaar fidin waxka qabashada dabeecadaha dadka (tusaale cilminafsiga iwm) iyo macalimnimo. Haddii aad iminkaba aad ogsoontahay waxa aad mustaqbalka aad ka shaqeyndoontid, iyo waxbarashada aad dhigandoontid, waxaad weydiinkareysaa, kalana tashankartaa qofka uqaabilsan waxbarashada dugsiyada (studie och yrkesvägledare) waxbarashada iyo takhasusyada aad ubaahantahay in aad dhigatid.

Waxbarashadu waxa ay ka koobantay

Waxbarashadan deegaanka iyo bulshadu waxa ay ka koobantahay casharo. Casharada qaarkood waa qasab in dhamaan ardayda dhiganaysa dugsiga sare ey qaatan casharadaas. Waxaa jira laakin casharo kale oo ugaar ah ardayda dhiganaysa waxbarashada oo kaliya. Waxaa intaa sooraaca in ay jiraan casharo kale oo aad adigu gaar u doorankartid.

Waxbarashadani waxa ay leedahay 4 takhasusood oo kaladuwan.taas oo macnaheedu ay tahay ardayda dhamaan dhigata waxbarashadan deegaanka iyo bulshadu ee kuna sugan dalkan iyo nawaaxigiisa waxa ay doorankaraan marba kii ayraabaan in ay ku takhasusaan.Waxaa laga yaabaa meelo qaarkood in ay jiraan takhasusooyin farabadan oo kala duwan. Kuwaas oo laga yaabo in ay adiga ay ku anfacikaraan ama ay kugu haboonyihiin. Waxaad weydiinkareysaa, kalana tashankartaa qofka uqaabilsan waxbarashada dugsiyada(studie och yrkesvägledare)

Takhasuska guud waxa uu ka mid ah.

- Dhaqaalaha –waxa uu yahay maadooyinka sida, barashada dhaqaalaha shirkadaha, sharciyada, barashada dhaqaalaha caalamiga, warbaahinta, habaynta qoraalka daabacadda.
- Dhaqanka iyo hidaha - Waxa uu khuseeyaa adiga haddii aad doonaysid in aad baratid dhaqanka-iyo taariikhaha,cilmiga diimaha,iyo suugaamaha.
- Luqadaha- Waxa uu khuseeyaa adiga haddii aad doonaysid in aad baratid luqado kale oo aan a heyn ingiriisiga.

Xidhiika suuqa shaqada

Marka aad ku jirtid waxbarashada deegaanka iyo bulshada waxa aadan sameen doonin tababar xirfadeed (APU) laakinse waxaa suurto gal noqonkarta in aad heshid tababar xirfadeed, kaas oo aad ku sameen doontid halmeel ama meelo kale oo kaladuwan oo farabadan inta waxbarashada dugsiga sare aad ku jirtid.waxayna ay ku xidhantahay hadba waxa ay waxbarashadaadu tahay,islamarkaana aad dhigatid.laakinse xidhiidhada aadleedahay iyo sida aad adigu shaqsi ahaan aad tahayna wax weyn ayey ku lug lahaan kartaa.

Mustaqbalka iyo shaqooyinka

Ardey farabadan ayaa ka dhigta waxbarashadan deegaanka iyo bulshada jaamacadaha. waxaa laga yaabaa in ay kugu adkaato sidii aad shaqo aad ugu heshid wax barashadaad kadib marka aad dhameysid waxbarashadaada. laakinse fursaduhu aad ayey u badan yihiin, haddii tusaale ahaan aad baratid sida dhaqaalaha shirkadaha, warbaahinada "IT" Waxaad weydiinkareysaa, kalana tashankartaa qofka uqaabilsan waxbarashada dugsiyada(studie och yrkesvägledare).